



Abaalmarinnada & sharaf siinta: Ardayda dugsiga Roosevelt oo lagu magacaabay da'yarta mutadawiciinta ah ee Oregon; ardayda oo sidii ugu fiicnayd u bartay juquraafiga, xisaabta

Kaiya Laguardia sannadkii maraysana udambeeyey ee dugsiga sare ee Roosevelt ayaa loo magacaabay mid kamida labada mutadawac ee da'yarta Oregon 2020 [abaalmarinta bulshada ruuxda taxadarka leh](#), waa barnaamij wadanka oo dhan ah oo sharfaya dadka dhalinyarada ah ficilada ay la soo baxeen ee tabarucaada ku dhisan.

Kaiya iyo kuwa kale oo la sharfay ee qaranka waxay heleen 1000 dollar oo abaalmarin ah iyo iyadoo laga bixiyey safarki bisha Maajo ee ay ku tageen magaalada Washington D.C., si ay ugu biiraan kuwa kale ee la sharfay ee qaranka kana qayb galay kulano socday afar maalmood iyo fursadi lagu magacaabi lahaa 10 ugu sareeya dhalinta mutadawiciinta ah ee wadanka.

Kaiya, taasi oo hooyadeed ku dhalatay jasiirada Okinawa ee dalka Japan, ayaa soo saartay filim duuban si ay sare ugu qaado wacyiga ku aadan dhismaha saldhig milateri ee la qorsheeyey in la sameeyo Okinawa iyo ka hor imaanshaha dadka u dhashay asal ahaan ahna dadka Uchinanchu, kuwaasi oo ka cabsanaya in dhaawac wayn soo gaaro quruxda bad waynta.

Kaiya ayaa iibisay buskudyo macmacaan si ay u maalgaliso barnaamijka, intaa ka dibna todobaadyo ayey ku joogtay Okinawa si ay u duubto muqaalo iyo iyadoo bixinaysay wareysiyo. Waxay dib u habaysay muuqaaladii markay ku soo noqotay Portland iyadoo isticmaashay dugsiga Roosevelt macmalka kambiyuutarka uu leeyahay iyadoo wax dhamaystiran ka soo saartay, "Kaydka jasiiradeena." Filimku wuxuu soo bandhigayey wacyigalin ku saabsan khasaaraha ku dhicikara deegaanka ee suurta galka ah waxaanay ka mid ahayd ardayda filim sameysay laguna daawaday [caleema saarka ugu wanaagsan damaashaadka filimka](#) caleema saarka ugu wanaagsan ee damaashaadka filimka PPS bisha sabtambar.

[\(daawo "Kaydka Jasiiradeena"\)](#)

Arday kale oo ku jiray PPS, Elliot Shin oo ku jira gabagabadii dugsiga sare ee Lincoln, ayaa soo gaaray tarka Taxadarka kama dambaystiisi. Elliot waxaa lagu sharfay in kharash laga bixiyo iyo in ay orado orodka Olivenbaum, oo ah mid aan dheeflaga helin kaasi oo bixiya waxbarid cilmi iyo casharo Muusiq oo lasiiyo qaxootiga ku nool agagaaraha Portland.

Dugsiga ACCESS, ardayda Sellwood aya meel sare ka gaaray barashada xisaabta: Kooxdii ka socotay dugsiga ACCESS iyo dugsiga dhexe ee Sellwood ayaa kala galay kaalimaha kobaad iyo labaad, si isxigta, Tartanka cutubka XisaabTirinta oo taxane u ah ardayda dugsiyada dhexe oo lagu qabtay xarunta tababarista waxsawirida ee magaalada Wilsonville.

Sage Moriyama , oo dhigta galaaska lixaad dugsiga ACCESS, ayaa galay kaalinta kobaad tartanka shaqsiya ah waxaanu ahaa ardaygii afraad ee dugsiga ka socda xaga qorshaha kaasi oo ku guulaystay tartanka kooxda. Sage waxaa ku soo biiray ardayda fasalka sideedaad oona kala ah Theodore Miranda-Zellnik iyo Max Rose-Innes, iyo fasalka lixaad Manu Isaacs.

Sage iyo Manu waxay ka mid ahaayeen afar arday oo ka socday ardayda ACCESS ku waasi oo u gudbay tartanka gobolka , oo ay weheliyaan fasalka sideedaad Angela Zhang iyo Alex Vassilev. Kooxda ACCESS waxaa tababaray macalin xisaabta dhiga Amy Mackinnon iyo macalin ku jira gurmada YongKang Chen.

Dugsiga Sellwood ayaa kaalinta labaad galay kooxdii tartamaysay oo ka koobnaa safashada fasalada sideedaad Celia Leedy iyo Theodore Hildebrand-Faust, iyo fasalada todobaad Alex Vennebush iyo Eli Vennebush. Alex Vennebush ayaa galay kaalinta labaad shaqsiyan. Kooxda dugsiga Sellwood waxaa tababare u ah macallimad xisaabta dhigta Linda White.

Ardayda ayaa ku tartamay abaalmarinta juqraafiga: Miyaad ka jawaabi kartaa su'aalahaan : wadamada ay ku jiraan Maldoova, Angoola iyo ayrland, keebaan xuduud la lahayn badweynta Altantikada? Matterhorn ayaa ku taala xuduuda u dhexeysa iswisarlaand iyo wadankee kale? Minnesota iyo Vermont –teebaa goboladan dhacda galbeedka harada Huron?

Sagaal arday oo dhigta dugsiyada ay dawladu maamusho ayaa si aad u heer sareysa wax u qabtay oo ku salaysan kuwan iyo su'aalo kale oo Juquraafi ah si ay u bartaan goobo ku jira juquraafiga qaranka ee tartanka GeoBee Oregon maalinta Jimha ah, 27 Maarso goobtuna waa Galbeedka Jaamacada Oregon ee Monmouth.

Tartanka ardayda ee fasalada 4-8, ayaa la qabanayaa sannadka 32^{aad}. Wuxuu ku bilaabmayaa tartamada dugsiyada, arday dhan 8661 oo noqonaya horyaalka dugsiyada ee dalka. Dugsiyada guuleystay waxay qaateen imtixaan lagu galayo onlaynka si ay u qaabeeyaan goobta 100 tartamayaal ah tartannada qaranka . sagaalka arday ee PPS kuwasi oo u soo gudbay kulanka gobolka Oregon waxay ka yihiin:

- Corey Cohen, dugsiga ACCESS at Vestal, fasalka 4^{aad}
- Mason Wunderle, dugsiga ACCESS at Lane, fasalka 8^{aad}
- Nathan Lauruhn, dugsiga Alameda, fasalka 5^{aad}
- Johannes Toll, dugsiga West Sylvan, fasalka 7^{aad}
- Calder Baker, dugsiga Robert Gray, fasalka 7^{aad}
- Jasper Bohem, dugsiga Mt. Tabor, fasalka 7^{aad}
- Harrison McDonell, dugsiga Sellwood, fasalka 6^{aad}
- Paul Oellrich, dugsiga Vernon, fasalka 8^{aad}
- Jefferson Furlong, dugsiga Winterhaven, fasalka 7^{aad}

Tartamayaashu waxay u tartami doonaan 1000 dollar oo abaalmarin ah kaalinta kobaad, iyo sidoo kale u gudbid horyaalka qaranka kaas oo la qaban doono bisha Maajo goobtuna waa xarunta dhexe ee Juquraafiyada qaranka oo ku taal Washington D.C.

Macallimad qoobka ciyaarka dhiga oo la sharfay: Oluyinka Parsons-Akinjiola, taasoo kadhigta qoobka ciyaarka dugisga Dhere ee Harriet Tubman iyo Faubion K-8, ayaa loo magacaabay Oregon dhexdeeda baraha sannadkan waxaana u magacaabay Ururka Waxbarashada Qoobka ciyaarka ee Oregon. Farshaxanyahanimadeeda iyo habka waxbarista ayaa waxa uu ku milmay qoob ka ciyaarka Africa, qurba joogta Afrika, qoob ka ciyaarka casriga ah iyo arimaha cadaalada bulshada.

Parsons-Akinjiola waxay ka heshay abaal marinteeda kulanka sannadlaha ah ee ODEO Eugene bishii la soo dhaafay.